Ku socota
waalidka/masyykada leh
carruurta fasalada 4 ilaa 10

Tixraacayaga: 2019/2879

Tixraacaaga:

Bergen 26.02:2019

Ku marti qaadka ardayda dugsiga inay ka qayb galaan xog ururinta ku saabsan u xoog sheegashada, saaxiibinimada iyo fayo qabka gu'ga 2019.

Warqaddan waxay ku socotaa waalidka/masuulada oo ku wargelinaysaa in dhammaan ardayda fasalada 4 ilaa 10 lagu marti qaaday inay ka qayb galaan xog ururinta waxa ku saabsan u xoog sheegashada, saaxiibtinimada iyo fayo qabka xaga dugsiga.

Warqadda macluumaadka sanadlaha ah ee waalidka aad yaya u dhammaystirantahay siday ahayd wakhtigii hore. Tani waxaa sababay Xeerka Xogta Gaar ahaaneed taas oo dhaqan gashay 20ka Juulay 2018. Iyadoo ku saabsan Xeerkan, Norway waxay taageertaa sharciga ilaalinta gaar ahaanshaha ee Midwoga Yurub ee loogu yeedho Sharciga Ilaalinta Xogta Guud (GDPR) Marka lagu daro waxyaabaha kale, GDPR waxay xoogayn doontaa ilaalinta gaar ahaanshaha ku saabsan habbaynta xogta gaarka ah. Sababtan awgeed, xog ururinta ardayga sanadlaha ah dib waxaa u eegay Sarkaalka Ilaalinta Xogta xaga Xarunta Nowayjiyaanka ee Xogta Cilmi baadhida (NSD).

Ujeedada
Xog ururintan waxay qayb ka tahay dedaalka dugsiga in la sameeyo deegaaan wanaagsan oo dugsiga ah oo badbaado u ah dhammaan ardayda xaga dugsiga oo waafaqsan Cutubka 9A ee Xeerka Waxbarashadda. Xog ururintu waxya siin doontaa dugsiga macluumaad qiime leh oo ku saabsan fayo qabka ardayda iyo badbaadada xaga dugsiga. Waxay sidoo kale siin doontaa tilmaanta sida wanaagsan ee dugsigan ugu guulaysanayo shaqada ku lidka ah u xoog sheegashada. Xogta la ururshay waxaa sidoo kale loo isticmaali doonaa cilmi baadhida ku saabsan u xoog sheegashada iyo deegaanka dugsiga, oo in dheeraad ah waxay horumarisaa tallaabooyinka gaarka ah ee lagu daray barnaamijka Olweus.

Kumaa ka masuul ah mashruuca cilmi baadhida?
Xarunta Cilmi baadhista Noorway AS (NORCE) waxay ka masuul tahay mashruuca oo waa mid ka mid ah ka ugu wayn machadyada cilmi baadhida madaxa banaan. Mashruucu waxa uu ku yaalaa waaxda caafimaadka ee shirkada NORCE Helse, iyo Xarunta Gobolka ee Ilmaha iyo Caafimaadka Maskaxda Dhalin yarada iyo Daryeelka Ilmaha (RKBU Vest) waxay ka masuul tahay hirgelinta xog ururinta.

RKBU Vest waxay sanad kasta ka heshaa deeqo waaxda Caafimaadka Noorwayjiga iyo Waaxda Noorwayjiga Waxbarashadda iyo Tababarka si loo sameeyo cilmi baadhid, wax barida iyo faafinta aqoonta si loo caawiyo horumarinta caafimaadka maskaxda ee carruurta iyo dhalin yarada. Dugsiyadu waa kooxaha yoolka muhiimka ah gudaha dedaalka xarunta si looga hortaggo, loo soo bandhigo oo wax looga qabto u xoog sheegashada iyo xad gudubyada kale ee carruurta dhexdeeda iyo dhalin yarada.

Maxaa ilmahaaga loo waydiinayaa inuuka qayb galo?
Dugsiyada bilaabay *Barnaamijka Olweus ee ku lidka ah u xoog sheegashada iyo dhaqanka ku lidka ah bulshadda* waxay helaan fursada lagu qabto xog ururinta ardayda sanad kasta. Tan waxay la xidhiidhaa ugu dhawaan 19,000 arday oo 108 ah dugsigada hoose iyo dugsiyada dhexe laga bilaabo 11 degmo oo ku yaala gudaha wadanka.

Barnaamijka Olweus, waxay ujeedadiisu tahay yaraynta u xoog sheegashada jirta ee ardayda iyo in laga hortago u xoogsheegashada mustaqbalka. Shaqada in laga hortaggo u xoog sheegashada gudaha dugsiyada waxay u baahan tahay dedaal muddo dheer oo nidaamsan. Qaybta muhiimka ah ee shaqada waa in lagula socdo horumarka dugsiyada gaar ahaaneed dhexda xog ururinta sanadlaha ah ee ardaydu ay ka jawaabaan.

Maxaa uu ka qayb galka ilmahaygu ku lug leeyahay?
Xog ururintan waxaa la qabtaa muddada saacdaha dugsiga. Ardayda caadi ahaan waxay isticmaalaan kombuyuutarka oo waxay ka jawaabaan foom onlayn ah, laakiin waxaa jira sidoo kale qaab warqad ah dugsiyada doorbidaya xalintan. Wakhtiga loo baahan yahay in lagu qabto xog ururinta waxa uu ku xidhan yahay da'da ardaydaga iyo xirfadaha akhriska, laakiin badanka waxay ku qaadataa ardayda ilaa 20 ilaa 40 daqiiqadood inay ka jawaabaan su'aalaha.

Ardayda waa *inaanay* bixin magacyadooda markay ka jawaabayaan xog ururinta. Markay ardaydu soo galaan xog ururinta, waxaa keliya la waydiiyaa haddii ay yihiin wiil ama gabadh, fasalka ay dhigtaan iyo magaca dugsigooda.;

Ardaydu waxay hagitaanka ka helaan shaqaalaha dugsigooda ka hor inta aanay bilaabin ka jawaabida xog ururinta. Foomku waxa uu ka kooban yahay su'aalaha ku saabsan fayo qabka xaga dugsiga, tirada saaxiibada ah ee fasalkooda iyo inta jeer ee u xoog sheegashadu ka dhex dhacdo ardayda. Waxa jira su'aalo ku saabsan noocyo kala duwan oo u xoog sheegasho ah tusaale isticmaalka luqadda xun iyo naanaysaha, laga reebo ardayda ciyaarta ama hawlaha kale, faafinta beenta, laadista, riixida, dagaalka iyo burburinta waxa ardayga kale haysto. Intaa waxa dheer, xog ururinta waxay isku daydaa inay daaha ka qaado halka dhismaha dugsiga falalkan xun ay ka dhacaan, iyo haddii ardaydu ay uga warbixiyeen dhacdooyinka waalidka, macalimiinta, walaalaha iyo saaxiibada, tusaale ahaan. Waa suuragal in la eego su'aalaha xog ururinta lagu isticmaalay xog ururinta RKBU Vest websaykeeda. **http://uni.no/nb/uni-helse/rkbuvest/sprreunderskelsen/** Qaabka ardayda fasalka 4aad uga gaaban tahay ardayda fasalada 5 ilaa 10.

Ka qayb galku khasab maaha
Ardaydu waxay go'aan ka gaadhaan lafahooda heshiiska waalidkood/masuulada haddii ay ka qayb qaadanayaan xog ururinta ama aanay ka qaybqaadanayn. Waalidka iyo masuulada waxay la xidhiidhi karaa dugsiga haddii *aanay* doonayn in ilmahoodu ka qayb qaato xog ururinta. Waalidka iyo masuulada ma sharaxayaan sababta

ardayga aanu uga qayb qaadanayn xog ururinta. Ardayda sidoo kale waxaa loo oggol yahay inay ka noqdaan xog ururinta ka dib markay bilaabanto.

Ardayda aan ka qayb qaadan xog ururinta caadi ahaan waxaa la waydiin doonaa inay qabtaa shaqo dugsi muddada wakhtiga xog ururinta la qabanayo. Si kastaba ha ahaatee, dugsiyada gaarkood waxay go'aan uga gaadhaan sida loo habbayn karo.

Ilaalinta gaar ahaanshaha ardayga — sida aan ku kaydino oo ku isticmaalno macluumaadka ka yimid xog qaadista

RKBU Vest waxay keliya isticmaali macluumaadka laga soo urushay ardayda ee ujeedooyinka aanu kugu wargelinay ee ku jira warqaddan. Waxaanu u habbaynaa macluumaadka si qorsoodi ah oo waafaqsan xeerka ilaalinta gaar ahaanshaha.Keliya maareeyaha mashruuca iyo labba cilmi baadhayaal ah ayaa heli kara macluumaadka hore sida dugsiga, heerka fasalka iyo sinjiga oo ku saabsan baadhitaanka shaqada mashruuca. Xiisaha cilmi baadhida xooga ma saarto dugsiga si gaar ah, laakiin way ururisaa natiijooyinka ka yimid dugsiyada kale. Nariijooyinka dugsiyada gaar ahaaneed lama daabici doono. Intaa waxa dheer, jawaabaha ka yimid ardayda shakhsi ahaan magaca waa la qarin doonaa daabacaada.

Xogta la urushay waxaa lagu kaydin doonaa serfar amni ah ee NORCE AS si looga hortaggo gelitaanka aan la oggolayn. Keliya maareeyaha mashruuca iyo cilmi baadhaha ayaa geli kara serfarkan.

Fure laga saaro ayaa la samayn doonaa oo ka kooban magaca dugsiga. Faylka erayga sirta ah lagu ilaaliyo oo wata furaha laga saaro ayaa lagu kaydin doonaa qaybta xusuusta usha erayga sirta ah lagu ilaasho oo waxaa laga eegi kabadhka faylka ah xaga RKBU Vest. Furahu waa qarsoon yahay oo oggolaanshana waxaa la siiya keliya maareeyaha barnaamijka, cilmi baadhid iyo shaqaalaha maamulka, dhammaan kuwaas oo haysta waajibaadyada qarsoodiga.

Xarunta Norwayjiyaanka ee Cilmi baadhida Xogta (NSD) waxay ka masuul tahay ururinta xogta. NSD WebSurvey waa nidaamka ururinta xogta waraysiga ee internatka lagu ururiyo. Marka dugsi dhammaysto xog ururinta,waxay heli karaan warbixinta la caadiyeeyay ee soo maraysa NSD WebSurvey. Suuragal maaha in la helo warbixinaha xog ururinta ee dugsiyada yaryar ee haysta wax ka yar 50 arday.

Maxaa ku dhacay macluumaadka marka la urusho?

Xogta la urushay muddada xog ururinta sanadlaha ah waxaa lagu kaydin doonaa NORCE AS. Xogta waxaa loo isticmaali doonaa warbixinaha la siiyay dugsiyada markaas waxay la socon karaan horumarka muddo wakhti ah. Shaqada cilmi baadhida ee RKBU Vest sidoo kale waxay aragtaa ahmiyada daraasaynta horumarka xiliga dheer ee dugsiyada bilaabaya barnaamijka Olweus.

Xuquuqaha ka qayb galaha mashruuca

Sharciga ilaalinta xogta waxa uu siiyaa tiro xuquuqa ah kuwan ka qayb gala xog ururinta (barbardhiga. qodobka 12-22 RKBU Vest waxa waajib ku ah inay ku wargeliso ka qayb galayaasha mashruuca ku saabsan habbaynta xogta gaarka ah iyo in la fududeeyo markaas waxay ku dhaqmi karaan xuquuqdooda:

- helaan gelida nooc kasta oo xogta gaarka ah oo laga diiwaangeliyay oo ku saabsan ardayga.
- sax xogta gaarka ah ee ku saabsan ardayga
- tirtir xogta gaarka ah ee ku saabsan ardayag.
- helaan nuqulka xogta gaarka ah ee ku saabsan ardayag.
- usoo gudbiyaan cabashada sarkaalka ilaalinta xogta ama Masuuliyiinta Ilaalinta Xogta Noorwayjiyaanka ee ku saabsan habbaynta xogta gaarka ah.

Xuquuqahu waxay la xidhaadhaan ilaa inta xogta gaar ahaanshaha ah la habbaynayo iyo marka ay suuragal tahay in si amni ah loo aqoonsado ardayga la diiwaangeliya. Ardayda *laguma* diiwaaniyo si toos ah macluumaad la aqoonsan karo sida magaca ama lambarka aqoonsiga gudaha mashruucan. *Keliya* macluumaadka hore sida magaca dugsiga, heerka fasalka iyo sinjiga ayaa la diiwaangelin doonaa. Sidaas awgeed, tan mamcnaheedu waxa weeye badanka xaaladaha suuragal ma ahaan doonto in la aqoonsado jawaabaha ka yimid ardayda shakhseed. Si kastaba ha ahaatee, xaaladahan halka ay caddaato inay suuragal tahay in la aqoonsado jawaabta gaarka ah ee ardayga, waxaanu caawimo badan ka bixin doontaa dhammaystirka xuquuqaha sare lagu sheegay.

Maxaa anaga nasiiya xaqa aanu ku habbayno xogta gaarka ah ee ku saabsan ilmahaaga?

Iyaddoo ku hadlaysa magaca NORCE AS, NSD — Xarunta Noorwayjiyaanka ee Cilmi baadhida Xogta AS waxay qiimaysay in habbaynta xogta gaarka ah ee mashruucan ay u hogaansanto xeerka gaar ahaanshaha xogta.

Ma jeclaan lahayd macluumaad badan?

Macluumaadka dheeraadka ah, la xidhiidh:

- Maareeyha Barnaamijka Mona E. Solberg at RKBU Vest, NORCE Helse
  Iimaylka: moso@norcereseach.no Telefoonka: 56 10 72 80.
- Madaxa Maamulka Cecilie Marie Fjellbakk xaga RKBU Vest, NORCE Helse
  Iimaylka: Olweusprogrammet@norceresearch.no Telefoonka: 56 10 72 23 .
- Xarunta Noorwayjiyaanka ee Cilmi baadhida Xogta AS
  Iimaylka: personverntienester@nsd.no Telefoonka: 55 58 21 17.

Kii rusheegaha kuu ahaa

Ann Heidi Nebb
Maareeyaha Xarunta/khabiirka cilmi nafsiga takhasuka haysta
RKBU Vest
NORCE

Mona E. Solberg
Maareeyaha Mashruuca/cilmi baadhaha
RKBU Vest
NORCE